

Su'aalaha badanaa la isweydiyo ee ku saabsan Nidaamyada qalin-jabinta ee fasalka 2020

Q: Maxaan u-heli weynay xafladda qalin-jabinta qof-ahaaneed?

A: Fadlan ogsoonooq qaadashada go'aankeena lagu qabanayo xafladaha qalin-jebinta ay noqoneysa oo kaliya (Internetka) inta lagu jiro aafadaan cudurka saameysay adduunka waxaana samaynaynaa wax kasta oo aan kari karno si aan ugu dadaalno caafimaadka ardaydeena, qoysaskooda, shaqaalaheena, iyo bulshadeena inay ka bed-qabaan COVID-19. Aniga oo ah Maamulihiiina guud, hubinayana in aysan CCS dhexeeda ka dhicin wax waxyeello caafimaad oo ah habka xafladda qalin-jabinta ee shaqsi ahaaneed ayaa maskax-dayda ka guuxaysey tan iyo bilowgii la xiray dhismayaasha dugsiyadeena. Qalin-jabinta tooska ah (Internetka) ayaana sameeya sidaas ee Fasalka 2020.

Q Sideen ku ogaan karaa maalinta aan imaanayo-soo qaadanayo koodhkeyga?

A: Fasalada 12aad waxay ka soo qaadan doonaan koofiyadooda iyo koodhadhkooda dugsiyadooda sare, ayadoo loo eegayo go'aanada jadwallada kala duwan ee uu soo saaray maamulaha dhisme kasta. **Waqtiyada soo qaadashada balanta waxaa loo qorsheeyey in layeerin doono magaca ugu dambeeyaa ee ardayda.**

Q: Maalinteyda soo qadashada koofidayda iyo koodhkayga haddeey shaqeyn weydo, sidee ayaan u bedelaa?

A: Wuxaado u baahnaan doontaa inaad isla markiiba email u dirto maamulaha dhismahaaga (dugsigaaga).

Q: Qoyskeygu gaari ma haysto. Xagee ayaan ku sugeynaa markaan soo-qaadaneyno koofida iyo koodhka?

A: Qoysaska aan lahayn gaadiid waxaa lageyn doonaa meel loogu talagalay inay ka soo qaataan koofida iyo koodhka.

Q: Ma inaan xiranaa (gashanaa, maaskaro)?

A: Sababo la xiriira tilmaamaha caafimaadka gobolka ee ku saabsan kala fogaan-shaha bulshada, waji-xidhka (fool-saabka) weji-daboolka ayaa si aad ah la idiinku dhiirrigeliya.

Q: Koodhku ma wuxuu u-ekaan doonaa midabada dugsiga?

A: Haa.

Q: Miyaan ku bixin karaa wixii lacag ah ee aanan bixin/ganaax, lacag jeeg ah (check), kaarka bangiga (credit card), ama lacag caddaan ah, (cash).

A: Waxa jira saddex aad kala dooran kato oo loogu talagalay in lagu bixiyo lacagaha laga rabo ardaydga ama ganaaxyada la soo dhaafay.

1. Kaarka bangiga (Credit card) ama lacag bixinta jeegga ee elektarooniga ah (eCheck) waxaana lagu bixin karaa Xarunta (Infinite Campus) iyadoo loo sii marayo ardayga ama bogga xiriirka waalidka.
2. Lacag caddaan ah, lacag jeegg ah, jeegaga lacag ahaanta ah ee loo yaqaan (money order) ama kaarka bangiga (credit card) lacagta waxaa laga bixinta karaa Central Enrollment, 430 Cleveland Ave., 43215 inta lagu guda jiro waqtiyada soo socda:
 - Khamiista, 21ka-Maajoy, 2020 - 9:00 a.m. – 12:00 p.m.
 - Talaadada, 26ka-Maajo, 2020 - 1:00 p.m. – 4:00 p.m.
 - Khamiista, 28ka-Maajo, 2020 - 9:00 a.m. – 12:00 p.m.
3. Qoysasku sidoo kale waxay boostada ugu diri karaan lacag jeegg ah ama lacagta jeegga loo yaqaano (money orde) waxaana lagu hagaajinaya Xarunta Waxbarashada Columbus (Lacagaha Ardayga/Ganaaxyada) (Columbus Education Center (Student Fees/Fines), ee 70 E. State St., Columbus, OH 43215. Lacagta la bixinayo waa inay kujiraan magaca ardayga, nambarka aqoonsiga ee ID-ga, dugsina, ganaaxa la bixinayey, iyo tirada.

Q: Goormaan ka soo qaadan karaa alaabteyda ku jira lookarkeyga (khaanaddayda)?

A: Maamulahaagu wuxuu kula soo xiriiri doonaa taariikho cayiman iyo saacado gaar ah, si ardaydu ay uga soo qaataan alaabtooda dugsiga. Hawshani waxay socon doontaa Talaadada, 26ka-Maajo, ilaa Jimcaha, 29ka- Maajo.

Q: Kombuyurakeyga (Chromebook-ga), qalabka, iwm waa la xaday ama waa dhumay (lumay). Maxaan sameeyaa?

A: Qoysaska ayaa mas'uul ka ah maqnaanshaha aaladaha elektiroonigga ah, qalabyada, iwm.

Q: Ma u baah-nahay inaan celiyo dhamaan alaabta dugsiga ka hor intaanan qalin jabin?

A: Haa

Q: Sideen ku heli karaa shahaadadeyda (dibloomadeyda)?

A: Ardayda ayaa u baahnaan doona inay soo qaataan shahaadadooda (dibloomadooda) taariikh iyo waqt dambe oo uu go'aamiyey maamulaha dhismahaaga.

Q: Sideen ku ogaadaa jadwalka qalin-jabinta?

A: Jadwalka isku dubadirka ee baahinta Fasalka 2020 waxaa lagu fidin doonaa bogga (shabakada) degmada ee ccsoh.us/classof2020.

Q: Goorma ayey noqoneysaa qalin-jabinta Jiilaalka (Kuleylaha), sidoo kale ma waxay noqon doontaa internetka, Online-ka ah (virtual)?

A: Qalin-jebinta Jiilaalka (Kuleylaha) waa 15ka-Agoosto, 2020, oo sidoo kale waxay noqon doontaa xaflad ah (internetka) online-ka-oo keliya. Munaasabadda xafadda waxaa si toos ah loo baahin doona 6:30 p.m.